



Waaxda Booliiska Minneapolis Buugga Xeerka iyo Nidaamka Booliiska

Lambar:
5-300

Mujalladda shanaad - Xeerka Anshaxa iyo Isticmaalka Xoogga

Isticmaalka Xoogga

5-311 **Doorashada Xakamaynta - Eyga Askarta**

(xx/xx/23)

Dib u eegis lagu sameeyay xeerarkii hore: (09/08/20) (01/01/23)

I. Ujeedo

Ujeedada xeerkan ayaa ah in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira eyga askarta.

II. Qeexitaano

Erayada lagu qeexay P&P 5-304:

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

III. Xeer

A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagidda

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

B. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka

1. Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliya eyga askarta si aan kala sooc lahayn, waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300).
2. Ey-yaasha askarta waa in la geeyo oo kaliya si waafaqsan P&P 7-807 Isticmaalka la oggol yahay ee Ey-yaasha askarta

C. Ka qabasho

Marka ey-yaasha askarta loo isticmaalo qabashada, gacan-ku-hayayaashu waa in ay kaqabtaan ey-yaashhooda askarta sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka dib marka la begsadaha la xakameeyo ama laga dhigo mid ammaan ah.

D. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka

1. Saraakiishu waxay mas'uul ka ah hubinta in qof kasta oo uu dhaawacay eyga MPD-ga uu helo daawaynta sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.
2. Saraakiishu waa in ay ka codsadaan u ambalaas goobta mar kasta oo qof ku qabashada eyga askarta.

E. Ogeysiisyada

1. Xakameeyaha eyga askarta waa inuu ogeysiyyaa sida ugu dhakhsaha badan saajinada eyga ka dib ku cabsi-gelin kasta ama qaniinyada kama'a ah ee eyga askarta.
2. Saraakiisha waxa waraysan doona kormeerayaasha qaybta eyda iyo tababarayaasha sida ugu dhakhsaha badan ogeysiiska ka dib.
3. Haddii saajin eey la waayo, saajin kale oo MPD ah ayaa laga yaabaa in looga baahdo inuu sameeyo dib u eegista xoogga (sida waafaqsan P&P 5-303.)

F. Bixinta xog qoraaleed rasmi ah

Tallaabooyinka soo socdaa ayaa dheeri shuruudaha bixinta qog qoraaleed rasmi ah ee P&P 5-302 iyo P&P 5-303:

1. Eyga skarta kuwa gacanta ku haya waa inay sawiraan dhammaan dhaawacyada oo ay xaqiijiyaan in sawirada la soo galiiyay si waafaqsan P&P 10-400.
2. Marka la ogeysiyo qaniinyada ama qabashada, sarkaalka eygu waa inuu buuxiyaa oo si elektaroonig ah u soo gudbiyaa Foomka Dib u Eegista Qaybta K-9 (K-9 Unit Apprehension Review form) (MP-9090) xubnaha guddiga dib u eegista.